

## Sharuuc Kooban oo Ku Saabsan Qashinka, Dhirta, Cawska iyo Wixii La Xariira.

Magaalada Seattle waxay maalgelin iyo dhiiri gelin ku sameeynaysaa dadweynaha ku nool degaanka Southeast Seattle sidii ay u hagaajin lahayeen degaankooda si ay uga faa'iidaystaan dadka ku nool iyo kuwa ka shaqeeya degaankaas. Ficilada Magaaladana waxaa dadka lagu soo ogaysiin doonaa Shirarka Bulshada ku nool Southeast Seattle, qorshooyinka derisyada iyo Diyaarinta Qorshaha degaanka ee Link Light Rail's Station.

Qeyb ka mid ah maalgelinta magaalada ee ku aadan degaanka Southeast Seattle, waxay tahay in magaaladu sameeyn doonaan sidii ay ku caawin lahayd dadka baayac musharka ah sidii ay ku fahmi laaayeen sharuucda magaalada ee ku aadan ka qaadida qashinka badan ee maqaasiinka iyo ka jaritaanka dhirta faraha badan ee ka baxda goobta dhismaha baayac mushtarkaasi ku yaal. Sharuucdaasi waxay dhowraan danaha guud ee derisyada iyo baayacmushtarka iyagoo ilaalinaya nabadgelyada iyo quruxda degaanka.

### Sidee baayacmushtarku uga faa'iidayaan doonaa?

Sharuucda faraya baayac mushtarka inay qashinka iyo dhirta ka qaadaan degaankoodu ma aha kuwo kor wax looga dhayayo kaliya. Laakiin waa mid faa'iido toos ah u leh baayac mushtarka degaanka ku yaal iyagoo ka dhigaya kuwo nadiif ah oo leh dhismayaal qurxoon:

- Una soo jiid doonaan macaamiil fara badan
- Kor u qaadaa qiimaha maalgelinta dhismayaasha
- Adkaysaa degmada baayacmushtarka iyadoo keenta maaglin dheeraad ah.
- Abuurta nabad gelyo, iyo degaan caafimaad leh.

### Waa maxay qashinku?

Waxyaabaha Qashinka ah waxaa ka mid ah:

- Qashinka caadiga ah
- Qalabkii hore iyo alaabta guriga
- Baabuurta halowday ee aan soconayn
- Qalabka dhismaha ee jajabay ee banaanka yaal sida Alwaaxda iyo rinjiga, iwm.

### Waa maxay denbiyada cawsaka aadka u baxay?

Cawska iyo dhirtu inay aad u baxdo oo la jari waayo waa mid lid ku ah sharuucda magaalada waana denbi markii:

- Ay aad u dheeraadaan oo soo gaaraan jidka dadku maro
- Markii ay ka goynayaan aragtida wadada dadka
- Qarinayaan calaamadaha jidka.

### Iska Ilaali Xaalada Keenaysa Qashinka Faraha Badan



Baabuurta halowda ee aan socon karin iyo qashinku waxay kaa eryayaan macaamiisha. Samee xaalad ku haboon macamiishaada adigoo iska qadaya qashinka aan loo baahnayn.



## Sidee Baan Ku Fuliya Awaamiirtan?

Ilaalinta sharuucda magaalada Seattle ee ku saabsan qashinka iyo sharuucda cawska iyo dhirta waa inaad ilaalisid sidii degaanka dhismahaadu uu ku ahaan lahaa mid nadiif ah oo si fiican looga shaqeeyo. Ka qaad oo ka nadiifi qashinka aan loo baahnayn ee yaala banaanka dhismahaada. Ka jar cawska iyo dhirta dhismahaada banaankiisa si ay ugu sahlayn dadweynuhu inuu si sahlan u maro degaankaada agtiisa wadooyinka ku yaal, jidadka iyo meelaha dadku maro.

**Magaaladu waxay doonaysaa marka ay dhaqan gelinayso sharuucdaan inay si sahlan ula shaqeeyso dadweynaha ee aanay qanaax siinin.** Magaalada Seattle sharuucdeedu waxay u ogolaanayaan in magaaladu si sahlan ula shaqeeyso baayac mushtarada sidii ay ku fulin lahaayeen arimahaan.

Magaaladu waxay ogsoon tahay in milkiilayaasha dhismayaasha qaarkood ay haysato dhibaato xaga dhaqaalaha ah oo dhib ku ah sidii ay ku fulin lahaayeen awaamiirtaas, hadaba xaaladahaas, magaaladu waxay diyaar u tahay inay la shaqeeyso oo caawiso shaqsiyaadkaas dhibaataadu haysato ama u baahan caawinaada ah sidii ay ku soo sixi lahaayeen jabinta sharuucdaas, mararka qaarkoodna waxay dibada ka raadsadaan shaqsiyaadkaasi. La Talin dheeraad ah ama caawinaad howlaha ka nadiifin qashinka ah.

Soo buuxinta sharuucdani waxay ka ilaalinaysaa baayac mushtarka in la ganaaxo lacag gaaraysa ilaa iyo \$500 maalin kasta.

***Waanu ku caawin doonaa, waxaanu ka dhigi karnaa degaankeena mid aad ugu wanaagsan baayac mushtarka.***

### Ilaali Cawska iyo dhirta ku taal degaankaada



Cawska aadka u baxay iyo dhirta faraha badani waxay kaa xairayaan meeshii ay dadwaynaha iyo macaamiishaadu ku soo mari lahaayeen.

**Wixii warbixin dheeraad ah ee ku saabsan isbdelada sharuucda Magaalada ka fiiri:**

Web: [www.seattle.gov/DPD/Enforcement/Clean\\_Up\\_Your\\_Act/Overview/default.asp](http://www.seattle.gov/DPD/Enforcement/Clean_Up_Your_Act/Overview/default.asp)

Qadka Warbixinta Sharuucda Dhismayaasha: (206) 615-0808

**Wixii warbixin dheeraad ah ee ku saabsan habka soo buuxinta sharuucda ka fiiri:**

Web: [www.seattle.gov/dpd/enforcement/code\\_compliance/Overview/](http://www.seattle.gov/dpd/enforcement/code_compliance/Overview/)